

09/04/2012

Ku: Dhamaan maxkamadaha Dalka.

Og: Xeer ilaaliyaha Guud

Og: Guddoomiyaha Maxkamadda Sare JSL

Og: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda JSL

UJ: Wargelin Maxkamadaha Dalka.

Dhamaan Maxkamadaha dalka, waxaan la socodsiinayaa in aan Qareenada ka hawl-gala Maxkamadaha Dalka aanay badiba Wasaarada Cadaalada ka qaadan Ruqsadii Qareenimo ama cusboonaysiintii Ruqsadiisa ee sanadlaha ahayd sida uu waajibinayo qodobka 2aad(1) iyo qodobka 11-aad (1)(2) ee Xeerka Qareenada (Xeer Ir.30/2004).

Hadaba, hawl galka Qareenka aan haysan Ruqsadii Qareenimo ama aan samaysan Cusboonaysiintii Ruqsadiisa ee swanadlaha ahayd waa sharci daro inuu Maxkamad horteed cid ka difaaco.

Sidoo kale, waxa aanu iyana sharcigu ogolayn, sida uu qeexayo Qodobka 2-aad (2) ee Xeerka kor ku xusan in la siiyo Ruqsad Qareenimo qofka ka tirsan Golayaasha qaranka (Golaha Guurtida, Golaha Wakiiladda, iyo Golaha Wasiiradda), Golayaasha deegaanka, shaqaalaha dawlada iyo ciidamada.

Sidaas darted, waxa laga codsanayaa dhamaan Guddoomiyayaasha maxkamadaha dalka inay hubiyaan in qof aan wadan Ruqsadii Qareenimo oo jardiidsan aanu qareennimo kaga hawl galin Maxkamadaha hortooda.

ALAAH MAHAD LEH.

(Xuseen Axmed Caydiid)

WASIIRKA CADAALADDA.